

Carruurtaadu ma diyaarbaa?

Wuxuu Xeerka Tallaalitaanka Minnesota u Baahan Yahay

Shuruudaha Tallaalka

Isticmaal shaxdan hage ahaan si aad u go'aamiso tallaalada looga baahanyahay in la isqoro daryeelka cunuga, barnaamijyada carruurnimada hore, iyo dugsiga (dawladda ama gaarka ah).

Hel da'da cunuga/heerka fasalka oo fiiri si aad u ogaato haddii cunugaaga helay tirada tallaalka ka muuqata calaamadaha saxiixinta ee ka hooseeya tallaalka walba. Jadwalka gadaasha wuxuu muujinayaa da'aha goorta marqaadashooyinka xilligoo taagan yahay.

Dhalashada illaa 4 sanno Barnaamijyada carruurnimada hore iyo Daryeelka carruurta	Da'da: 5 illaa 6 sanno ^③ Ee Dugsiga barbaarinta	Da'da: 7 illaa 11 sanno Fasalka 1 ^{aad} illaa 6 ^{aad}	Da'da: 12 sanno iyo ka weyn Fasalka 7 ^{aad} illaa 12 ^{aad}
Cagaarshowga A (Hep A) ✓			
Cagaarshowga B (Hep B) ✓✓✓	Cagaarshowga B ✓✓✓	Cagaarshowga B ✓✓✓	Cagaarshowga B ^⑦ ✓✓✓
DTaP/DT ✓✓✓✓	DTaP/DT ^④ ✓✓✓✓✓	✓✓✓ teetanada iyo gowracadatada ee wadata garoojooyinka ^⑥	✓ Tdap ^⑧ & ugu yaraan 2 teetanada iyo gowracadatada ee wadata garoojooyinka
Dabeyl ✓✓✓	Dabeyl ^⑤ ✓✓✓✓	Dabeyl ✓✓✓	Dabeyl ✓✓✓
MMR ✓	MMR ✓✓	MMR ✓✓	MMR ✓✓
Hib ✓			Meningococcal ^⑨ ✓ & xoojinta
Bakteeriyaalka dhiiga ^① ✓✓✓✓			
Busbuska ^② ✓	Busbuska ^② ✓✓	Busbuska ^② ✓✓	Busbuska ^② ✓✓

Tallaalada lagu taliyey laakiin aan shardi ahayn:

Hargabka

Sannadlaha oo dhammaan carruurta da'da 6 bilood iyo ka weyn

Faayruska dhiiga
Ee dhallaanka

Human papillomavirus
Da'da 11 -12 sanno

- ① Looma baahna kadib 24 bilood.
- ② Haddii cunugga uu mar hore ku dhacay cudurka busbuska, tallaalka busbuska looma baahno. Haddii cudurka uu dhacay kadib 2010, dhaqtarka cunuga waa inuu saxiixaa foom xaqiijinayo cudurka.
- ③ Ardayda fasalka koowaad oo 6 sano jir ah ama ka yar waa inay raacaan jadwalada dabeysha iyo DTaP/DT ee dugsiga barbaarinta.
- ④ Tallaalka shannaad ee DTaP looma baahno haddii durista afraad ay ahayd kadib 4 jirka. Marqaadashada ugu dambaysa ee DTaP ee 4 jir ama kadib.
- ⑤ Durista afraad ee dabeysha looma baahna haddii durista saddexaad ay ahayd kadib 4 jirka. Marqaadashada ugu dambaysa ee dabeysha ee 4 jir ama kadib.
- ⑥ U baahan caddayn ugu yaraan ay kujiraan marqaadashooyinka saddex teetano iyo gowracato. Haddii taxanaha tallaalka DTaP/DT u dhan yihiin, ma jiraan marqaadashooyin dheeraad ah oo loo baahan yahay.
- ⑦ Jadwalka labo duris oo kale ee cagaarshowga B ayaa sidoo kale loo isticmaali karaa carruurta da'dooda tahay 11 ilaa 15 jir.
- ⑧ Hal qiyaas tallaalka Tdap ayaa loo baahanyahay laga bilaabo heer fasallada 7aad. Walibana waxa loo baahan yahay ugu yaraan laba qiyaas tallaalka oo ay ku jiraan teetanada iyo gawracatada (DTaP/DT/Td).
- ⑨ Hal marqaadasho ayaa loo baahan yahay laga bilaabo fasalka 7aad. Marqaadashada xoojinta waxaa sida caadiga ah lagu siiyaa 16 jirka.

Ka reebidda

Si la isaga diiwaangeliyo daryeelka carruurta, barnaamijyada carruurnimada hore, iyo dugsiga Minnesota, carruurta waa inay muujiyaan inay qaateen tallaaladan ama fayl garaystaan ka dhaafid sharci ah.

Waaladiinta waxay fayl garaysan karaan ka dhaafid caafimaad oo uu saxiixay bixiye daryeel caafimaad ama ka dhaafid aan caafimaad la xidhiidhin oo uu saxiixay waalidka/masuulka oo la sharciyeeyey.

Miyaad raadinaysaa Diiwaanada?

Marka la eego nuqullada diiwaanada tallaalka cunugaaga, la hadal dhaqtarkaaga ama ka soo wac Xiriirka Macluumaadka Tallaalka Minnesota (Minnesota Immunization Information Connection, MIIC) 651-201-3980.

